# Matxafka  Qarniga

## Hordhac Yaal

## Hordhac

In ka badan qarni ayaa matxafkani waxa ay uruurisay ama keydineysay taariikhda.  Taas oo ka kooban qalfoofyo ilaa iyo kubada cagta ee Maraykanka, Sahan uruurinta balaadhan anagoo isticimaalayna mowduucyo kala duwan iyo sheekooyin ku saabsan dadka degan Waqooyiga Bari ee Wisconsin.

### Wakhtigii Barafka

**Wakhtigii Barafka**

Waxa ad ka fekertaa adiga oo halkan taagan 13,000 sanaddood kahor. Waxaa laga yaabaa in aad taagnaan lahayd afka hore ee godka barafkaas oo u eg kan dhinacaaga midig .

Wareegyo badan oo ah barafka dhaqdhaqaaqa ayaa dhacay ila markii u bilowday  Taariikhdii Barafkii Weynaa taasoo ku beegneyd  kahor  2.6 milyan oo sano.

 Xaashida Barafka Laurentide, oo ka soo bilowday Canada, wuxuu soo galay Wisconsin ka dibna wuu dhalaalay dhowr  jeer inta lagu guda jiray mudadaas. Dhacdadii ugu dambaysay waxaa  adduunka oo dhan looga yaqaanay  Barafoobidda Wisconsin.  Mudaddaas waxaa soo maray saddex wareeg oo baraf ah iyo wareegyo kale oo dhalaalay  ee Waqooyi Bari ee  Wisconsin, kuwaas oo bilaabmay  kahor 35,000 oo  sano. Marka uu barafkaas xoogga leh  dhaqaaqo wuxuu si weyn u bedelayaa dhulka uu sii maray.

Barafikii ugu dambeeyey ee daboolay Wisconsin wuxuu milmay qiyaas ahaan 12,500 oo sano kahor. Sidii  ay yeelaanba, dooxo durduraya ayaa ka soo rogmaday dusha barafka oo dalooliyey barafka. Wakhti ka dib waxay dhulka hoostiisa ka samaysteen godad baraf ah  sida kan oo kale .

### Barashada Qadiimiga ah

**Barashada Qadiimiga ah**

**Tusaalooyin Waqtigii Hore**

Barashada aqoonta qadiimiga ah ayaa ka badan barashada  farshaxanka. Barashada aqoonta qaddimiga ahi waxay isu keentay baadhitaanka shaqada goobta si ay u abuurto sawir  sidii dadku u noolaayeen waqtigii hore iyadoo ku salaysan wixii ay ka tageen.

Farshaxanimadu ma aha oo qudha waxa barashada aqoonta qadiimiga ah oo keliya waxa ay raadiyaan . Waxa kale oo ay raadinayaan isbedelka lakabyada ciida , midebkeeda , iyo sida ay dareemayso marka aad taabato. Barayaasha aqoonta qadiimiga ah waxay soo shaac bixiyeen astaamaha sida derbiyada,

derbiyada dhejiska iyo godadka. Yoolku waa in laysu soo uririyo waxaas oo dhan si loo helo sawir kaamil ah oo sheegaya sidii ay noloshu ahayd waqtigii hore.

Barayaasha aqoonta qadiimiga ah waxay si xoogan uga shaqeeyaan sidii ay ku ilaaalin lahaayeen goobaha dhaqanka, laakiin qodista ayaa runtii burburinaysaa goobaha . Marka haddii goob la qodo layskuma celin karo si looga dhigo sidii ay ahayd markii hore. Haddii qofka waxa qodaya uusan isticimaalin farsamooyin habboon ama uusan qaadan qoraal wanaagsan , macluumaadku way lumi karaan weligoodba.

Seddaxda Qaybood ee Qoditaanka

1. Baadhitaanka

Macluumaadka waxaa laga heli karaa khariidadaha, xisaabaadka qoran , diiwaangelinta guryaha , warbixinnada qodista, iyo sawirada. Waxbixintani waxay ka caawinaysaa barayaasha aqoonta qadiimiga ah sidii ay xooga u saarilahaayeen meesha ugu wanaagsan shaqadooda. Intii aan qodista la bilaabin, waxaa muhiim ah in warbixinta la soo uruuriyo ku saabsan goobta suurtogalka ah. Tani waxaa ku jira baadhitaanadii hore, warbixin aasaasi ah, ama, qoditaan hore.

2. Shaqada Goobta

Barayaasha aqoonta qadiimiga ah ee tababaran waxay tagaan goobta waxay si cilmi ahaan ah u qodi ama u qodaan. Waxay haystaan qoraalada oo faahfaahsan iyo diiwaangelin waayo mar hore haddii goobta la qodo weligeed sidii hore laguma celin karo.

3. Falanqeyn

barayaasha aqoonta qadiimiga waxay qaataan qoraalodooda, sawiro, khariidada, iyo farshxanda ay heleen dabadeena way bartaan .Warbixinta ay helaan dabadeena waxaa lala wadaagaa barayaasha aqoonta qadiimiga ah iyo shacabka. Farshaxanka la helay waxaa inta badan lagu kaydiyaa carwooyinka sida tan oo kale. Guriga dhaqanku wuxuu daryeelaa uruurinta si cilmi baarayaasha mustaqbalka ay u helaan.

**<u>Dadka</u>**

**Dadka Waqooyiga Bari ee Wisconsin**

Dadku waxay ku noolaayeen Waqooyiga Bari ee Wisconsin boqolaal sano. Qaarkood , Sida Menominee, waxay deganaayeen halkan intaa in ka badan, halka kuwo kalena, sida

waxyaabaha aasaasiga ah ayaa wuxuu dhaqan walba ka dhigayaa mid khaas. Halkan ka baro sidii dadku, waqtigii hore iyo haddaba, ay u muujinayaan dhaqankooda sida ay u dabaal degaan.

**<u>Dhanka guriga</u>**

**Guriga ku soo dhawow**

Gurigu waa waxa ka badan afar derbi iyo saqaf.

Waxay ka koobnaan kartaa qoys, caadooyinka, iyo waxa qoysku leeyahay, kuwaas oo dhamaantood habeeya qaabka aad u nooshahay nololshaada.

Halkan ka baro mid muhiima ah oo ka mid ah qaabaha guriga - jikada - sida ay u ekayd 1930-yadii iyo 1950-yadii

Sidee gurigaagu ugu ekyahay ama uga duwanyahay ? Maxaa is bedelay ? Maxaa sidii hore weli ah ?

**<u>Bandhiga Walxo la Isu Soo Uruuriyay</u>**

Bandhiga walxo la isu soo Uruuriyay

Matxafkani wuxuu daryeelaa farshaxano laga soo uruuriyey aduunka oo dhan, taariikhdoodu tahay kumanaan sano. Farshaxanimada aanad arkin waxaa lagu daryeelaa goobta kaydinta. Uruurinta kaydka waxaa ka buuxa armaajoyin iyo khaanado u eg kuwan.

Neville waxay uruurinaysay farshaxanka in ka badan boqol sano. Laga soo bilaabo 1915-kii, matxafku waxay uruurisay in ka badan 100, 000 oo shey oo saddex-cabbir ah, hal milyan oo sawiro ah iyo afar milyan oo fiit oo ah filimka wararka.

Qarnigii la soo dhaafay oo dhan waxa ay xoogga saartay uruurinta isbedelay.Bilowgii xoog saaridu waxay ahayd uruurtina soo bandhigada taariikhda iyo farsharxanka deegaanka Sanadihii ka dambeeyey waxaa fooda la saarey in la kordhiye laguna daro farshaxanka laga keenay addunka oo dhan:Yoolka waa in "Adduunyada loo keeno Green Bay." Maanta matxafku waxay ururisaa farshaxan sheegaya sheekooyinka Waqooyiga Barei ee Wisconsin iyo Michigan-ka Sare.

Ka dhex baadh safafkan khaanadaha iyo armaajooyinka Khasnadaha ka soo jeeda ururinta kala duwanaanta iyo qaderinta Neville. Halkan waxaad ka helaysaa in ka badan kun, farshaxan oo matalaya qayb yar oo ah wax yaabaha matxafku daryeelo .

**<u>Warshada</u>**

Warshada

Warshadaha ugu sareeya waxaa si istabajoog wax u yeelaan ariima bey'adda iyo dadka doorta in ay ka samastaan guriyo Waqooyiga Bari ee Wisconsin.

Saddex boqol oo sannadood ka hor ganacsiga hargaha ayaa wuxuu ahaa ganacsiga kowaad ee Waqooyiga Barei ee Wisconsin. Maanta, warshadaha warqadaha iyo soosaarida farmaajada ayaa waxay taageerataa dhaqaalaha degaanka .

Helitaanka khayraadka dabeeciga ah, farsamada iyo xirfada dadka degan ayaa ka dhisay warshado heer sare ah Waqooyiga Beri ee Wisconsin. Haddii ay tahay beero, gurashada barafka, ama sameynta warqadaha, khayraadka iyo dadka waa loo baahan yahay si warshaduhu u guuleystaan.

**Nolosha Beeraha Yar-yar**

Qalab kala duwan, dulqaad aan dhammaad lahayn, iyo John Vandenplas wuxuu beeralayda reer Belgium ooga baahnaa 2,000 saacadood  si uu u xardho nuqulkan guriga waalidkiis ee ku yaal badhtamaha Degmada Brown.  Beertan 1880 ee lagu xardhay diiwaanka yar ee  nolosha ayaa cabbirkeedu la ekaa hal inji ah ilaa hal cag. Shaxan kasta oo goobta ka muuqda wuxuu matalaa xubin qoyska ka tirsan ama saaxiib.

**Khilaaf**

Khilaaf

Khilaafku waa  qayb ka mid ah waayo arignimad bani’aadamka  ilaa iyo maalintii  la abuuray..

Isdhexgalka bani’aadamka iyo meel, iyo dadka kale waxay keenaan najiito laga dareemo taariikhda oo dhan. Khilaafka khilaafka uu ka dambeeyo, wuxuu abuuraa isbedel habeeya adduunka aan maanta ku noolahay.

Adduunka intiisa badan waxa uu galay  dagaal sannaddkii  1914-kii, laakiin Mareykanku  wuxuu  ka daawanayey meel fog ugu yaraan saddex sano . Dagaalka ma ay soo gelin ilaa Maraakiibta   dagaalka badda  ee Jarmalku  ay quusiyeen saddex markab oo Maraykanku leeyahay markii ay taariikhdu ahayd March  1917-dii . Markii ay taariikhdu ahayd April 6, Maraykanku waxay ku darsameen ciidamadii isbahaysiga ee dagaalka  waxayna ku dhawaaqeen dagaal ay  Jarmalka la geleen .

“Dagaalkeni waa dagaalkii lagu dhameyn lahaa dagaal oo dhan.” — Woodrow Wilson, 1917

**Sawir**

Farshaxkanka waa mid meel walba yaal.

Waa sifo aadamiga guud ahaan in lagu muujiyo shucuur iyadoo loo maraayo qaabab farshaxan oo kala duwan. Farshaxanka waxaa laga heli karaa gidaarka madxafka, dhismaha dhinaciisa, ama masraxa.

Sawiradda la habeeye waa  tusaale muujinaya farshaxankii soo jiray qarniyadii hore. Farshaxanka sawirrada ah wuxuu muujiyaa u ekaansho, shakhsiyad, iyo xitaa jawiga midka fadhiya. Waxay muujin kartaa shaqadiisa, waxa uu jecel yahay, ama xaaladda bulshada iyada oo lagu daro faahfaahinta sida dharka, timaha, ama jijimaha. Walxaha ku xeeran sawirka waxay  muuqaalka ku daraan taariikh nololeed waxayna waxayna gudbinaysaa aragti taariikheedka ee ku saabsan nolosha qofkaas.

> 13-ka Tammy Konitzer wuxuu qayb ka ahaa *farshaxan sanadeedka* 2020, sanad walba matxafka wuxuu martigaliyaa bandhig faneed heer sare ah. Waxay matalaysaa waxkabaddalka 13-aad ee Dastuurka Mareykanka: Qeybta 1aad, "Addoonsi ama gumeysi qasab ah midba kuu noqdo, marka laga reebo ciqaabta fal dambiyeedka oo si sax ah loo xukumay, ayaa ka jiri doona Maraykanka gudihiisa, ama meel kasta oo hoos timaada awooda Maraykanka."

**Waqooyiga Beri ee Xeebta Wisconsin**

**Saddex Boqol oo sano taariikhdeeda**

In ka badan 300 oo sano ka hor , reer Yurub waxay yimaadeen afkaWebiga Fox waxayna bilaabeen in ay la ganacsadaan dadka degaanka u dhashay. Ilaa markaa, Wagooyi Beri ee Wisconsin waa isbeddelay ,waxaana dhaliyey dadka gobolkan ugu yeedha gurigooda. laga bilaabo markii monstrance hadyad ahaan u siiyay hawlgalka Jesuit sahamiyaha Nicolas Perrot ee sannadkii 1686-dii ilaa hadda oo funaanadii kubada cagta ee Mayraykanka ninka iyaara ee layidhhado Donald Driver, Farshxanimadani waxay sheegeyaan sheekooyinka isbedelka muuqaalka Waqooyiga Beri ee Wisconsin.